



Dugsiga Dhaqanka Örebro

Waxay caruurta iyo dhallinyaradu halkan wax ku samayn karaan sawir iyo dhoobo, qoobka-ciyaar, heeso, tumista qalabka muusiga iyo jilista ruwaayadaha.

Waxbarashadayada

Waxbarashada Dugsiga Dhaqanka ee sawirka, qoobka-ciyaarka iyo ruwaayaduhu ma aha qasab. Waxa la sameeyaa wakhtiga firaaqada ah laakiin marmarka qaarna wakhtiga dugsiga. Waxan haynaa waxbarasho shakhsi ah iyo waxbarasho koox ah, waxayna ku xidhan tahay maadada ama koorsada. Waxan haynaa waxbarasho ku habboon caruurta iyo dhallinyarada curyaamada ah.

Yaa dalban kara?

Waxbarashadayada waxa loogu talagalay dhammaan dadka ku nool degmada Örebro laga bilaabo sannadka uu noqonayo sagaal jir. Waxa kale oo aan haynaa qoobka-ciyaarka caruurta laga bilaabo afar jir iyo heesaha kooxaha laga bilaabo todoba jir. Qofku wuxu ka qaybqaadan karaa waxyaalaha ka socda Dugsiga Dhaqanka ilaa iyo sannadka uu noqonayo 19 jir ama uu dhammaynayo dugsiga sare.

Kharashka iyo kirada qalabka

Waxbarashadayada aan qasabka ahayn lacag baa la bixiyaa.

Qalabka muusiga (violin(qoorta lagu qabto), cello(ka hore oo wayn), clarinet, oboe, trumpet(saddexdani waa nooca la afuufo) iwm.) waxa laga kiraysan karaa Dugsiga Dhaqanka.

Soo dhawaw oo nala soo hadal wixii warbixin dheeraad ah: 019-21 12 30

Waxa kale oo aad booqan kartaa boggayaga: www.orebro.se/kulturskolan

Waxan joognaa oo kale dugsiyada iyo qaybaha magaalada

Dugsiga Dhaqanku waxa kale oo uu ka qaybqaataa waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe. Macalimiinta Dugsiga Dhaqanka iyo kuwa dugsiga hoose/dhexe waxay ka wada shaqeeyaan sidii loo horumarin lahaa waxbarashada loona heli lahaa habab cusub oo shaqo. Qaabaynta farshaxanimada iyo hababka shaqo ee dimuqraadiyaddu waa wax wada socda. Dugsiga Dhaqanku waxa kale oo uu ka qaybqaataa horumarinta qaybaha degmada.

